Cinwaanka Siyaasadda Qaan-sheegta iyo Aruurinta	**Lifaaqyada** ☐ Haa ☒ Maya
Erayada muhiimka ah Aqbalida, Daynta, Ururinta, Samafalka, Is-caymiska, Caymiska dhiman, Caymis la'aan	**Lambarka** RH-BP-AD25:00 15
Qaybta Dhaqannada Ganacsiga (Business Practices – BP)	**Taariikhda uu Bilaabanayo** **1-1-16**
Gacan Ku Maamulka	**Taariikhda Dib-u-eegista ugu Dambeeyey** **02-9-21**
Waxaa Bixiyey Maaliyadda	**Taariikhda Dib-u-eegista Xigta** **03-01-22**
Khusaynta Waxay khusaysaa kuwa ka raadinaya iyo/ama ka helaya daryeelka caafimaadka Regions Hospital (Isbitaalada Regions), kuwa bixiya lacagaha iyagoo ka wakiil ah Bukaanada Regions, shaqaalaha Isbitaalka, hay'adaha deyn ururinta iyo qareennada sharciga deynta.	**Taariikhda Bilowga Deynta** **11-16-05** **Taariikhda Dhammaadka Deynta laguma dabaqi karo**
Mas'uuliyadda Dib-u-eegista Mas'uulka Sare ee Maaliyadda ee Isbitaalada Regions	**La xiriir** Mas'uulka Sare Maaliyada ee Isbitaalka Regions (CFO)

Ujeeddada Siyaasadan Qaan-sheegta iyo Aruurinta waa qeexida qaabka Regions Hospital ee helida lacag bixinta daryeelka la siiyay bukaanada. Haddii ay dhacdo lacag-bixin la'aan, Isbitaalka waxaa ka go'an in uu sameeyo dadaal macquul ah oo lagu go'aansanayo haddii bukaanka xaq u leeyahay kaalmada dhaqaale kahor inta aan la guda gelin tallaabooyinka la xiriira aruurinta. Waaxda Adeegyada Dhaqaalaha Bukaanka Isbitaalku waxay awood u leedahay isla mar ahaantaana uu xil ka saaran yahay inay go'aan ka qaadato bal haddii Isbitaalka uu sameeyay dadaal macquul ah oo lagu go'aansanayo haddii shaqsi u xaq leeyahay kaalmada dhaqaale iyo haddii Isbitaalka u ogolaaday in uu ka hawlgalo tallaabooyin gaar ah oo la xiriira aruurinta kuwaasoo lagu qeexay Siyaasadan Qaan-sheegta iyo Aruurinta. Regions Hospital ma u dulqaadanayaan xadgudub, dhibaateyn, dulmi, been, qiyaano, ama luuqad marin habaabin ah ama dhaqanka aruurinta ee qareenka aruurinta deynta iyo hay'da, iyo wakiilkooda iyo shaqaalaha, iyo shaqaalaha Isbitaalka ee masuulka ka ah aruurinta caafimaadka ee bukaanada. Dhammaan bukaanada, oo aan laga eegin kartidooda ay ku bixiyaan lacagaha, waxaa ay helayaan "Sida Ula dhaqan Naxariis ah" ee la xiriira dadaalada aruurinta ee ay sameeyeen Regions Hospital. Dadaalka aruurinta waraaqahaan waxaa lagu joogteynaya dhammaan fasalada la xisaabiyay.

Regions Hospital
HealthPartners

TALLAABOOYINKA LAGA YAABO IN ISBITAALKA UU QAADO SI UU U HELO LACAGTA KHARASHKA

Isbitaalka waxaa laga yaabaa in uu ku lugyeesho hawlaha aruurinta ujeedada lagu helayo lacag bixinta daryeelka. Qaar ka mid ah hawlaha aruurintu waa kuwo ka muhiimsan hawlaha kale isla mar ahaantaana waxay u baahan yihiin in la helo qoraal ogeysiin ah oo loogu talogaley bukaanada, sida lagu qeexay Siyaasadan. Si kastaba ha ahaatee, Isbitaalka lagama rabo in uu bixiyo ogeysiis qoraal ah oo loogu talogaley bukaanada marka la qabanayo hawlaha la xiriira aruurinta kharashka aan muhiimka ahayn.

Isbitaalka **loogama** baahna inuu siiyo ogeysiin bukaanada kahor ka hawlgelinta hawlaha aruurinta xigta:

- U dirista bukaanka bayaan xisaabeedyada ee ku jiraan haraaga la soo dhaafay iyo kuwa haatan taagan
- Isku day la xiriira wada-hadal lagu xalinayo bixinta lacagta lagu leeyahay qofka
- U gudbinta akoontiga bukaanka ee loogu talogaley waax sadexaad oo qaabbilsan aruurinta deynta ama hay'ada qaabbilsan arrimaha sharciga
- Dirista waraaqaha ama wicitaanada taleefonka, taasoo laga dirayo Isbitaalka, hay'ada qaabbilsan aruurinta ee wakiilka ka ah Isbitaalka, ama hay'ad kale oo mataleysa isbitaalka

Isbitaalka **waxaa** looga baahanyahay inuu siiyo ogeysiin bukaanada kahor ka hawlgelinta hawlaha aruurinta (sidoo kale loo yaqaan "Tallaabooyinka Aruurinta aan Caadiga aheyn" ama "Extraordinary Collection Actions" (ECAs)):

- Ka iibinta deynta bukaankanka hay'ada aruurinta ama shirkada sharciga
- Bilaabida dacwadaha sharciga, ee Isbitaalka ama wakiilka isbitaalka, ee laga yaabo in ay ku jirto
    - Cabasho yar/maxkamada heshiisiinta
    - Xukumada
    - Damaanada hantida
    - La wareegida akoonka bangiga ama hantida kale ee gaarka ah
    - Abaalgudka mushaarka
- Diidmada, difaacida, ama u baahan lacag bixinta kahor inta aan la siinin daryeelka mustaqbalka. Isbitaalka uma diidayo daryeelka degdega ah sabab la xiriirto lacag-bixin la'aanta daryeel hore oo isbitaalka wuxuu u hogaansamayaa dhammaan shuruudaha Daaweynta Caafimaadka Degdega ah iyo Xeerka Shaqada (Emergency Medical Treatment & Labor Act, EMTALA).
- Ku wargelinta deynta gobolka oo dib u qabsiga daqliga

DADAALADA LAGU GO'AANSANAYO XAQ U LAHAANSHAHA KAALMADA DHAQAALE

Codsiyada iyo Ogeysiinada:

Isbitaalka wuxuu ogolaanayaa oo ka baarandagayaa codsiyada kaalmada dhaqaale laga bilaabo taariikhda daryeelka la siiyay bukaanka iyo dhammaadka **240 maalmood** kadib bayaan xisaabeedka koowaad ee ka saarida isbitaalka kadib. Isbitaalka wuxuu qaadayaa tallaabooyin lagu ogeysiinayo bukaanada wax ku saabsan Siyaasadda Kaalmada Dhaqaale ee Isbitaalka oo kuma lug lahaan doono Tallaabooyinka Aruurinta Aan Caadiga Aheyn ee kor lagu sheegay ugu yaraan **120 maalmood** laga bilaabo bayaan xisaabeedka koowaad ee isbitaal ka saarida kadib ee bukaanka. Haddii akoonka bukaanka uu ku lugleeyahay qaybo badan oo daryelka ah, Isbitaalka kuma lug lahaan doono Tallaabooyinka Aruurinta Aan Caadiga Ahayn oo ugu yaraan **120 maalmood** laga bilaabo bayaan xisaabeedka koowaad ee ka saarida isbitaalka kadib ee daryeelkii ugu dambeeyay.

Ugu yaraan **30 maalmood** kahor, Isbitaalka wuxuu bilaabayaa Tallaabooyinka Aruurinta Aan Caadiga Ahayn ee lacag-bixin la'aanta, Isbitaalka wuxuu sameynayaa sida xigta:

- Bixinta qoraal ogeysiin ah (inta badan waa warqad lagu hagaajinayo ciwaankii boostada ugu danbeeyey ee bukaanka) kaasoo bukaanka lagu ogeysiinayo in:
    - Kaalmada dhaqaale waxaa loo heli karaa shaqsiyaadka xaqa u leh
    - Isbitaalka laga yaabo in uu qaado tallaabooyinka aruurinta qaarkood (ECAs) si loo heelo lacag bixinta
    - Isbitaalka waxaa laga yaabaa in uu ku bilowdo tallaabooyinka aruurinta qaarkood (ECAs) 30 maalmood kadib taariikhda warqada ogeysiinta
- Warqadda ogeysiinta kula lifaaq xaashi luuqad bayaan oo ay ku qoran tahay guudmar ku saabsan Siyaasadda Kaalmada Dhaqaale ee Isbitaalka
- Isku dayga lagula xiriirayo bukaanka taleefon ahaan (ama qof ahaan haddii ay suurtogal tahay) si af ahaan loogu wargeliyo bukaanka macluumaadka ku saabsan Siyaasadda Kaalmada Dhaqaale ee Isbitaalka iyo sida uu bukaanku ku heli karo kaalmo la xiriirta habraaca codsiyada

Haddii isbitaalka go'aansado inuu dib ugu dhigo ama u diido daryeelka aan degdega ahayn sabab la xiriirto lacag-bixin la'aanta daryeel kahor, Isbitaalka wuxuu sameynayaa sida xigta:

- In bukaanka la siiyo qoraalka ogeysiinta taasoo ay weheliso:
    - Foomka codsiga Siyaasadda Kaalmada Dhaqaale
    - Qiraal caddeyn ah oo ku saabsan in la heli karo kaalmada dhaqaale ee loogu talogaley shaqsiyaadka u-qalma iyo waqtiga kama-danbeysta ee Isbitaalku qabanayo codsiyada

kaalmada dhaqaale ee loogu talogaley daryeelka hore ee bukaanka

- Habraac, ku saleysan qaab degdeg ah, wax alla wixii codsi ah ee la xiriira kaalmada dhaqaale ee ay helaan bukaanadu kahor inta aan la gaarin waqtiga kama-danbeysta ah

Codsiyada aan Dhameystirneyn:

Haddii Isbitaalka helo codsiga kaalmada dhaqaale oo aan dhameystirneyn ama tayo yar, Isbitaalka wuxuu sameynayaa sida xigta:

- Joojinta wixii Tallaabooyin Aruurin Aan caadi ahayn
- Siinta bukaanka iyo warqada ogeysiinta sheegeyso warbixinta dheeraadka ama waraaqaha ah in la soo gudbiyo codsiga laga baaran dago, waqtiga dhammaadkiisa ee sheegida aasaaska warbixinta, iyo sida loola xiriiro Isbitaalka in sidaas la sameeyo
- Haddii uu bukaanka buuxiyo codsiga la xiriira kaalmada dhaqaale taasoo waafaqsan muddada loo baahan yahay in wax lagu codsado, Isbitaalka wuxuu si dhaqso ah u qaadanayaa go'aan sida ku cad qeybta hoose ee Codsiyada Dhameystiran.

Codsiyada Dhameystiran:

Haddii uu Isbitaalkauu helo codsi aan dhameystirneyn ee kaalmada dhaqaale inta lagu jiro muddada codsiga Isbitaalka, Isbitaalka wuxuu sameynayaa sida qaab waqtiyeysan:

- Joojinta wixii Tallaabooyin Aruurin Aan caadi ahayn
- Sameey go'aaminta xaq ulahaanshaha kaalmada dhaqaale iyo waxa lagu saleeyay go'aaminta (Fiiri Siyaasadda Kaalmada Dhaqaale)
- Haddii Isbitaalku go'aansado in bukaanka xaq u leeyahay kaalmada dhaqaale, Isbitaalka wuxuu ku tallaabsanayaa arrimaha hoos ku xusan:
    - Haddii bukaanka uu u-qalmo ka dhimista qayb ah (aan ahayn 100% dhimis), Isbitaalka wuxuu siinayaa bukaanka haysta bayaan xisaabeed tilmaamaya sida qaddarta loo go'aansaday iyo warbixinta la xiriirta xisaabaha kaalmada dhaqaale ee Isbitaalka.
    - Dib u celinta wixii lacag ah ee uu bukaanku ku bixiyey daryeelka taasoo ka badan xaddiga lacagta ee la go'aamiyey inuu shakhsi ahaan bukaanku mas'uul ka yahay.
    - Sameey dhammaan tallaabooyinka la heli karo ee macquulka ah ee lagu bedelo wixii tallaabooyin aruurin ah ee laga yaabo in lagu bilaabo haraaga la dhimay qaraabada bukaanka.

Go'aaminta Xaq ulahaanshaha Loo maleeyay:

Waxaa dhici karta inuu isbitaalku gaaro go'aano sadaalin oo xaq ulahaanshaha kaalmada dhaqaale ah. Tani waxay ula mid tahay in Isbitaalka laga yaabo in uu go'aansado in bukaanka xaq uleeyahay kaalmada dhaqaale oo ku saleysan warbixinta Isbitaalka uu mar hore hayo, iyada oo aan jirin ka helida tooska ah bukaanka ee warbixin dheeraad ah. Haddii Isbitaalka uu si saadaalin ah u go'aansaday in bukaan uu xaq u leeyahay kaalmada dhaqaale, laakiin la ogaado inuu xaq u leeyahay wax ka yar kaalmada ugu badan, Isbitaalka wuxuu ku qaadayaa arrimaha soo socda:

- Ogeysiinta bukaanka ee go'aanka iyo ogeysiinta bukaanka ee sida loo codsado kaalmo dhaqaale oo dheeraad ah
- Sii bukaanka tiro macuul ah ee waqtiga la codsanyo caawin dheeraad ah
- Ka baaran daga codsiga dhameystiran ee kaalmada dheeraad ah sida lagu qeexay Siyaasadda Qaan-sheegta iyo Aruurinta ee kore

Nidaamyada Qaan-sheegta iyo Aruurinta

Habraacyada Qaan-sheegta:

Regions Hospital wuxuu leeyahay xeerar iyo nidaamyo diyaarsan oo lagu hubinayo gudbin waqtigeeda oo saxan ee sheegashooyinka ee bixiiyaha xisbiga sadexaad. Isbitaalka uma soo dirayo tirada xad dhaafka ah ee midaas ee bukaanka masuul ka noqonayo in uu la haado bixiyaha xisbiga saddexaaad ama tiro walba ee la diiday sabab la xiriirta qaladka qaan-sheegta Isbitaalka. Isbitaalka uma gudbinayo wax biil hay'ada aruurinta xisbiga sadexaad ama qareenka aruurinta iyada oo sheegashada lacag bixinta laga sugayo bixiyaha xisbiga sedaxaad, taas oo isbitaalka heshiis la leeyahay.

Regions Hospital waa in uu lahaadaa nidaamka u fududeynta bukaanka in uu su'aalo ama diido biilalka. Isbitaalka wuxuu sameynayaa wicitaanka ugu badan iyo ka jawaabaan su'aalaha la xiriiro su'aalaha ku saabsan biilasha bukaanka ee qaab waqtiyeysan ah. Haddii bukaan soo ogeysiiyo Isbitaalka, qareenka aruurinta deynta, ama hay'ada aana qabin biilka, dhammaan howlaha aruurinta waa la joojinayaa ilaa waraaqda la siiyay in bukaanka uu qabo deynta ama in bixiyaha xisbiga sadexaad uu bixiyay lacagaha oo dhan ee waajibka ku ah.

Nidaamyada Aruurinta:

Bukaanka wuxuu helayaa qoraalada haraaga sabab la xiriirto adeegyadooda ee leh marka laga reebo Kaalmada Caafimaadka ama haddii uu ku caymisanyahay heshiisyada ee sheega caymis buuxa. Qoraalada bukaanka wuxuu wataa ogeysiinta lambarada taleefonka ee loo wacayo dhaqaalaha ama caawita kale haddii bukaanka aysan u suurtogaleynin in uu sameeyo lacag bixin buuxdo sabab la xiriirto dhibaatada dhaqaalaha.

Hawsha aruurinta waxaa lagu maamulayaa cabirka, bixiyaha caymiska, iyo da'da akoonka. Regions Hospital wuxuu isticmaalayaa nidaamyada aruurinta tooska ah, adeegyada aruurinta guriga, taleefonka, waraaqaha aruurinta, adeegyada qareenka, Barnaamijka Dib u qabsashada Daqliga iyo ka baxsan hay'adaha aruurinta' adeegyada ay saameyneyso aruurinta akoonkeeda la heeli karo. Iyo ogolaanshaha hore ee Regions Hospital, wixii bukaan ah ee bixinayo ugu yaraan 10% ee haraagiisa/haraageeda sabab la xiriirta bishiiba ma quseyneyso hawsha aruurin kale, laakin waxaa lagu celinayaa baarandaga aruurinta. Dadka degan Minnesota ee aan caymisneyn waxay helayaan qiimo dhimis waafaqsan heshiiska isbitaalka ee Qareenka Guud ee Minnesota. Dhammaan hay'adaha oo dhan ee ku shaqeynayo matalaada Regions Hospital waxaa lagu dhiirogelinayaa in ay ka laabtaan warbixinta iyo bukaanka si loo go'aansado kartida lagu bixinayo. Akoonada ee Isbitaalka uu leeyahay ciwaanka boostada oo qaldan ee qoraalada laga yaabo in la geliyo aruurinta dhinaca rasiidk ee shaeeyada boostada soo noqday.

Akoonada lagu go'aansaday in dhaqaaalo ahaan aan la aruurin karin iyo u baahan dadaal badan waxaa loo gudbinayaa hay'adaha aruurinta ka baxsan ama qareenada. Xiliga go'aaminta saboolnimada, hay'adaas waxaa laga filanayaa in ay ku laabtaan akoonka iyo joojiyaan dabagalka akoonka.

Ka kansalida:

Ka kansalida haraaga akoonada bukaanka si loogu daryeelo samafalka iyo deynta aan la bixin karin waxaa si gaar loogu ogolaado heerarka xiga:

Haraaga ka sareeya $50,000 – Agaasimaha Is-daryeelka Bukaanka

Haraayada u dhaxeeyo $25,000 iyo $50,000 – Maamulaha Adeegyada Dhaqaalaha Bukaanka

Haraayada ka hooseeyo $25,000 – Ay Qabteen shaqaalaha Xisaabiyahah Bukaanka ama nidaamyada iswada

Fiiro gaar ah: Xaq u lahaanshaha samafalka waxaa loo xaqiijiyay elektaroonig ahaan, ama lagu go'aansaday si ku saleysan u-qalmashada barnaamijyada kaalmada dawladda/gobolka, haraaga ka hooseeyo $50,000 uma baahna dib u eegida gacameed iyo/ama ansixin.

Isticmaal Maalgelinta Gobolka Ramsey:

Regions Hospital waxaa waajib ku ah in ay ula dhaqmaan daqli hooseeyo dadka degan Gobolka Ramsey. Ka kansalida dadka degan Gobolka Ramsey waxaa u lacag celiya Gobolka Ramsey ee baaxada maamulka miisaaniyada la heli karo.

Hay'adaha Aruurinta Deynta

Sarkaalka Madaxa Fullinta (Chief Executive Officer, CEO) dib, uma eegayo wax ka yar sannadlaha, wax heshiis iyo diiwaanada waxqabadka ee wixii xisbi sadexaad ee kulug leeyahay hay'ada aruurinta deynta si loo go'aansado in heshiiska sii joogteeyo in uu u baahanyahay sameynta waafaqsan hawlgalka Regions, qiyamka iyo xeerarka iyo haddii hay'ada aruurinta deynta ay ugu dhaqmaan qaab waafaqsan howlgalka Regions, tayada iyo xeerarka.

1. Heshiisyada qoran waxaa loo isticmaalayaa in lagu qoro diyaarinada wixii hay'ad ah ee ku shaqeeya in ay aruuriyaan deynta bukaanka.
2. Regions Hospital uma gudbinayo wax akoon ah hay'ada aruurinta deynta xisbiga saddexaad ilaa la xaqiijiyo in:
    a. Waxaa jiro aasaas macquul ah ee la aamino in bukaanka uu qabo deyn.
    b. Dhammaan bixiyayaasha la ogyahay ee xisbiga saddexaad si ku haboon ayaa loogu diray biilka, iyo bukaanka ayaa masuul ka ah deyntooda hartay.
    c. Haddii bukaanka uu tilmaamay awood la'aan lagu bixiyo tirada oo buuxdo, bukaanka waxaa la siiyay qorsho lacag bixin macquul ah. Isbitaalka uma gudbinayo bukaanada hay'adaha aruurinta deynta ee sameynaya sida lagu qeexay qorshooyinkooda lacag bixinta.
    d. Bukaanka waxaa la siiyay fursada lagu gudbinayo Codsiga Kaalmada Dhaqaale ee Regions Hospital. Haddii bukaanka gudbiyay codsiga Kaalmada Dhaqaale, dhammaan howsha aruurinta waa la joojinayaa ilaa codsiga laga baaran dago.
    e. Heerka ogolaanshaha u baahanyahay si go'aano looga gaaro ogolaanshaha meeleynta ee hay'ada aruurinta deynta xisbiga sadexaad waa:
        i. Haraaga ka sareeya $50,000 – Haraaga Agaasimaha Is-daryeelka Bukaanka ka hooseeya $50,000 – Ay Qabteen Shaqaalaha Xisaabaadka Bukaanka ama nidaamyada iswada
3. Regions Hospital ma u dulqaadanayaan xadgudub, dhibaateyn, dulmi, been, qiyaano, ama luuqad marin habaabin ah ama dhaqanka aruurinta ee qareenka aruurinta deynta iyo hay'ada, iyo wakiiladooda iyo shaqaalaha.

4. Regions Hospital wuxuu u baahanyahay in hay'adaha aruurinta deynteeda iyo qareenka hayaan cabashooyinka diiwaanka ee laga helay bukaanka ee la xiriiro dhaqanka hay'ada. Intaa waxaa dheer, hay'adaha aruurinta deynta iyo qareenka waxaa looga baahanyahay in ay joogteeyaan diiwaanada taariikhda, saacada, iyo ujeedada xiriirada oo dhan ee ku socda ama ka yimid bukaanka.
5. Regions Hospital wuxuu ogeysiinayaa iyo tababarayaa hay'adaheeda aruurinta deynta iyo qareenka ku saabsan xeerarkooda samafalka Daryeelka iyo sida bukaanada laga yaabo in ay ku helaan warbixin dheraad ah, soo gudbi codsiga iyo u gudbi bukaanka isbitaalka wixii gudbin ee codsiyada samafalka daryeelka.

Dacwada maxkamada Aruurinta Deynta

Si sannadle ku saleysan, Regions Hospital CEO ayaa dib u eegayo oo go'aansanaya haddii la sameynayo ama aan la sameynin ama cusbooneysiinta wixii heshiis ah ee qaba qareen ee aruurinta deynta xisbiga sedexaad. CEO wuxuu tixgelinayaa haddii qareenka aruurinta deynta uu ku dhaqmay qaab waafaqsan hadafka iyo qiyamka Regions Hospital. Xadiiska Gollaha Guud ee Isbitaalka waxay kormeerayaan dhaqanka qareenka xisbiga sadexaad iyo kormeerida dhammaan dacwadaha.

1. Regions Hospital masiinayaa ogolaanshaha daboolida hay'ada aruurinta deynta ama qareenka in ay qaadaan tillaabo sharci ah ee ka soo horjeedo bukaanada ee aruurinta deynta caafimaadka ama ogolaanshaha daboolida lagu dabagalayo xukunka mushaarka bukaan walba ama akoonada bangiga.
2. Isbitaalka ma siinayo hay'ada aruurinta deynta ama qareen walba maamulka lagu dirayo wax dacwad sharci ah ee ka soo horjeedo bukaank gaar ah ee aruurinta deynta caadgimaadka ilaa shaqaalaha isbitaalka iyo heer ku haboon ee maamulka u ogolaado dacwada kadib markii la xaqiijiyo midaas:
    a. Waxaa jiro aasaas macquul ah ee la aamino in bukaanka uu qabo deyn,
    b. Dhammaan bixiyayaasha xisbiga sadexaad ee la yaqaan waxaa si sax loogu diray biilka, iyo in deynta hartay waa masuuliyada dhaqaalaha bukaanka
    c. Haddii bukaanka uu tilmaamay awood la'aan lagu bixiyo tirada oo buuxdo, bukaanka waxaa la siiyay qorsho lacag bixin macquul ah
    d. Bukaanka waxaa la siiyay fursada lagu gudbinayo (kaalmada dhaqaale) codsiga Daryeelka Samafalka,
    e. Ma jiraan wax sabab ah ee la aaminayo in mushaarka bukaanka ama lacagaha waxay u badanyihiin in laga reebo xukunka
    f. Heerka maamulka looga baahanyahay oo lagu go'aansanayo ogolaanshaha xukunka waa:
        i. Haraaga ka sareeya $50,000 – Agaasimaha Is-daryeelka Bukaanka

ii. Haraayada ka hooseeya $50,000 – Maamulaha Adeegyada Dhaqaalaha Bukaanka

3. Regions Hospital ma u dulqaadanayaan xadgudub, dhibaateyn, dulmi, been, qiyaano, ama luuqad marin habaabin ah ama dhaqanka aruurinta ee qareenka aruurinta deynta iyo hay'ada, iyo wakiiladooda iyo shaqaalaha.
4. Qareenada, shirkadaha sharciga, ama qareenada aruurinta deynta xisbiga sadexaad waxaa lagu dooranayaaa iyo sida waafaqsan heshssi toos ah oo lala galo Regions. Hawlahaan looma wakiilanayo xisbi walba oo saddexaad.
5. Regions Hospital waxay u baahanayaan in qareenada aruurinta deynta xisbiga sadexaad uu qaado talaabooyin gaar ah ee la xiriiro aruurunta deynta caafimaadka, maxkamad ugu yeerida, cabashooyinka, xukunka iyo waraaqaha kale ee la xiriiro.
6. Xafiiska Gollaha Guud wuxuu ku ansixinayaa si gaar ah oo ku saleysan dacwad-ku-dacwad wixii fullin la'aan garsoorida ah.
7. Dhacdada in bukaanka gudbiyo cabashada in akoonkiisa uu yahay kareebida xukunka, qareenka aruurinta deynta ma diidayo cabashada ka reebida iyada oo aan la helin ansixinta gaarka ah oo, dacwad-ku-dacwad ee Xafiiska Gollaha Guud.